

TUSUHA SICIRKA BADEECADAHA

NOFEEMBAR 2020

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Nofeembar 2020 ayaa ahaa 121.18, marka la barbardhigo 120.61 bishii Octoobar 2020.

Isbedel bileedka, Nofeembar 2020, marka la barbar dhigo Octoobar 2020, ayaa sare u kacay 0.48 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac dhan -0.02 boqolkiiba bishii Octoobar 2020. Qiima koror bileedka ugu badan ayaa ahaa **Cuntada & cabitaanada oo gaaray** (+1.07 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid cuntadda iyo cabitaanadda (+1.10 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Qudaarta (+7.01 boqolkiiba) iyo Miraha (+1.32 boqolkiiba) (Jaantuska 2aad).

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Nofeembar 2019 iyo Nofeembar 2020) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu sare u kacay 4.37 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 3.75 boqolkiiba ee 12kii bilood (Octoobar 2019 iyo Octoobar 2020).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Nofeembar 2020 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Nofeembar 2020	
Tusaha bishan Nofeembar 2020	121.18
Tusaha bishii hore Octoobar 2020	120.61
Tusaha sanadkii hore Nofeembar 2019	116.10
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.48%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	4.37%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB

Tixraaca TSB

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Nofeembar 2020

Heerka sicir-bararka bisha Nofeembar 2020 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar 2019 iyo Nofeembar 2020.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 4.37 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar 2019 iyo Nofeembar 2020, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Octoobar 2019 iyo Octoobar 2020 oo ahaa 3.75 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ayaa sare u kacay 0.48 boqolkiiba bisha Nofeembar 2020, marka labarbardhigo hoos u dhac gaaraya -0.02 boqolkiiba bishii Octoobar 2020.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Nofeembar 2020.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 1.07 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Nofeembar marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -0.52 boqolkiiba bishii Octoobar 2020. taasna waxaa sababay qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah oo qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -2.44 boqolkiiba Nofeembar 2020. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ahaa -3.59 boqolkiiba Octoobar 2020.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa laga dareemay dhaqdhaqaaq la'aan bille ah 0.00 boqolkiiba intii lagu guda jiray Nofeembar 2020, marka la barbardhigo sare u kac bille ah 0.42 boqolkiiba bishii Octoobar 2020. Sare u kac sanadlaha ah ee bisha Nofeembar 2020 ayaa gaaray 12.55 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Octoobar 2020 oo ahaa 12.48 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB & qeybaha laxushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Nofeembar 2020 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi sare u kacay 19.87 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+22.08 boqolkiiba) iyo kabaha (19.09 boqolkiiba) taasoo ka dhalatay sare u kac ku yimid dharka dumarka oo gaaray +23.85 boqolkiiba), caruurta 26.31 boqolkiiba iyo kabaha oo ahaa +19.09 boqolkiiba.
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaas** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 12.55 boqolkiiba bisha Nofeembar 2020, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha Agabka guryaha lagu hagaajiyo iyo dayactirka guryaha (10.58 boqolkiiba). qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid Mutuleelka guryaha oo gaaray +20.69 boqolkiiba).
- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya (22.07 boqolkiiba) bishii Nofeembar. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitalada oo gaaray (+94.41 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo noqday(+150.00 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 8.94 boqolkiiba ee Nofeembar 2020, marka la barbardhigo 8.45 boqolkiiba oo la diiwaan geliyey bishii Octoobar 2020. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid agabka guryaha iyo adeega farsamada agabka guryaha (+3.11 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 15.26 boqolkiiba Nofeembar 2020. Sare u kaca waxaa sababay alaabada daryeelka shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+13.05-boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha agabka korontada ee loo adeegsado daryeelka shaqsi ahaaneed (+10.26 boqolkiiba).


War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Nofeembar 2020 (-)

- **Tubaakada** ayaa sameysay hoos u dhac sanaddle ah oo gaaraya -3.38 boqolkiiba Bishii Nofeembar 2020. Sida la wariyey hoos u dhaca ugu weyn ayaa ahaa in qiimaha Qaadka uu ahaa mid aan fadhin bishii Nofeembar 2020, dhaqdhaqaaqa Tubaakada ayaa ah kuwo qiimahoodu Sabeeyo.

B. Heerka sicirbararka marka loo eego tusha sicirka badeecadaha

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Nofeembar 2020 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Nofeembar 2020 (+)

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 1.07 boqolkiiba, inta lagu jiray bishii Nofeembar 2020 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -0.52 boqolkiiba bishii Octoobar 2020. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha qudaarta oo gaaray +7.01 boqolkiiba,

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Nofeembar 2020 (-)

- Guud ahaan, dhamaan qeybaha majiraan isbedel qiima dhac muuqda oo la taaban karo bisha Nofeembar 2020

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Nofeembar 2020 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Nofeembar 2019 TSB	Octoobar 2020 TSB	Nofeembar 2020 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	116.10	120.61	121.18	0.48	4.37
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	124.55	120.22	121.51	1.07	-2.44
Tubaakadda	1.25	142.16	137.35	137.35	0.00	-3.38
Dharka & Kabaha	5.03	120.68	144.66	144.66	0.00	19.87
Guryaha, Biyaha, Korontada& Gaaska	23.41	103.26	116.22	116.22	0.00	12.55
Agabka Guryaha	2.93	102.71	111.40	111.90	0.45	8.94
Caafimaadka	5.00	118.92	145.16	145.16	0.00	22.07
Gaadiidka	3.77	110.57	112.00	110.30	-1.52	-0.24
Isgaarsiinta	2.80	96.32	101.31	101.31	0.00	5.17
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	98.45	98.54	98.54	0.00	0.09
Tacliinta	4.00	107.75	108.58	109.80	1.13	1.91
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	135.90	138.76	138.76	0.00	2.10
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	105.03	121.58	121.06	-0.43	15.26

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Diseembar 2020 waxaa la baahin doonaa 15 Janaayo 2020. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistiskada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Nofeembar 2020 marka loo eego COICOPka

Dhammaan qeybaha TSB

Qeybaha ka qeybqaata (%) Heerka sicir bararka(COICOP)



Isha Xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha Sibteembar 2020 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia